


DIB U DAJINTA MARAYKANKA?

Markaad isu diyaarinayso inaad dib u dajin u aado Maraykanka, waxa jira wax badan oo aad u baahantahay inaad barato. Markaad bilabayso noloshaada cusub, halkan waxaad ka heli kartaa toban fariimood oo muhiim ah oo ay tahay inaad ogaato:

- 1 Qof ayaa kugula kulmi doona gegida dayuuradaha ee meeshaada ugu dambaysa ee aad u socoto. Kahor intaadan dhoofin, waxaad saxiixi doontaa Ogeysiiska Ballanqaadka kaas oo aad ballan ku qaadayso inaad dib u bixinayso kharashka duulistaada ee Mareykanka.




- 2 Markaad u guurto Mareykanka, waa caadi inaad la kulanto naxdin dhaqameed oo aad wajahdo caqabado. Si aad gacan uga geysato laqabsigaada, xaqiiqso inaad barato Ingiriisiga, la kulanto dad cusub, oo aad sahamiso bulshadaada cusub.




- 3 Wakaalada dib udajinta deegaanka ayaa ku siin doonta adeegyada aasaasiga ah si ay u daboolaan baahiyahaaga bilowga ah oo ay kuu gudbiyaan adeegyo dheeraad ah oo ku salaysan xaq u yeelashada. La qaado wakhtigaada ugu badan shaqaalaha dib u dejinta adoo la yeelanaya xidhiidh wanaagsan.

- 4 Caawimada dowlada ee dadweynaha waa ay xaddidan tahay, taageeraduna way kala duwan tahay iyadoo ku saleysan goobtaada iyo tirada qoyskaaga. Ha barbar dhigin dheefahaaga faa'iidooyinka dadka kale, maadaama aanay isku mid ahaan doonin.



- 5 Markaad timaadid Maraykanka, waxaad yeelan doontaa guri. Waxay u badan tahay inay noqoto guri dabaq ah oo laga yaabo inaanay ahayn doorashadaada kugu habboon, laakiin waxay noqon doontaa nadiif, la awoodi karo, oona ammaan ah. Kharashyada guriyeynta ayaa noqon doona qaybta ugu badan ee kharashyadaada bishii.



- 6 Qiimaha nolosha ee dalka Maraykanka ayaa ah mid aad u sarreeya, sidaa awgeed shaqa helidu waa sida ugu dhakhsaha badan ee lagu gaari karo isku filnaansho. Aqbalida shaqada ugu horeysa ee laguu soo bandhigo waa muhiim, xitaa haddii ay u badan tahay inaysan ku jirin xirfadda aad dooratay.



- 7 Si aad caawimaad u hesho markaad kujirto xaalad degdeg ah, ka wac 911 taleefoonka una sheeg xiriiriyaha waxaad u baahan tahay (Police - "Boliska," Fire - "Dab", ama Ambulance - "Ambalas") iyo ciwaankaada ama goobtaada.




- 8 Dalka Mareykanka, sharciyadu waxay ilaaliyaan xuquuqda dadka oo dhan. Waa inaad barataa oo aad raacdaa sharciyada Aqoon la'aanta sharciga kama difaacayso in lagu ciqaabo haddii aad sharciga jabiso.



- 9 Nidaamka daryeelka caafimaadka ee Maraykanka waa mid adag. 12ka bilood ee ugu horeysa, waxaad yeelan doontaa caymis caafimaad. Shaqaalaha dib u dejinta ayaa kaa caawin kara ka jawaabista su'aalaha oona ay bixiyaan macluumaad dheeraad ah.



- 10 Ilaali macluumaadkaaga gaarka ah, sida dukumeentigaaga IOM, baasaboorkaaga, lambarka akoonkaaga bangiga, iyo lambarkaaga social security. Had iyo jeer ka digtoonow haddii lagu weydiyo inaad la wadaagto macluumaadka sirta ah si shakhsi ahaan ah ama khadka tooska ah.



MA QABTAA SU'AALO DHEERAAD AH? WAXBADAN KABARO BARTA SETTLE IN

Settle In waa meeshaada ugu fiican ee aad ka heli karto macluumaad la aamini karo oo sax ah oo ku saabsan dib u dajinta gudaha wadanka Maraykanka. Settle In waxa lagu heli karaa luqado badan oo waxayna bixisa muuqaalo, podcastiyo, iyo agabyo kale oo ku saabsan mawduucyo kala duwan oo ku saabsan nolosha Maraykanka.



Booqo settleinus.org



The contents of this fact sheet were developed under an agreement financed by the Bureau of Population, Refugees, and Migration, United States Department of State, but do not necessarily represent the policy of that agency and should not assume endorsement by the Federal Government. **This material is in the public domain and may be reproduced.**